

Foomka Oggolaanshaha ee Baaritaanka Antigiinka Dhakhsaha ah ee COVID-19

Magaca Ardayga:
Taariikhda Dhalashada Ardayga:
Dugsiga:
Magaca Waalidka/Masuulka:
Ciwaanka Guriga:
Lambarka Taleefanka:

Fadlan si taxadar leh u akhri ogaysiiska soo socda ee oggolaanshaha faahfaahsan kadibna saxiix oggolaanshaha baaritaanka COVID-19.

1. Waxaan fahmayaa in baaritaanka COVID-19 ee ardayga magaciisu kor ku yaalo lagu samayn doono baaritaanka antijiinka ee Shaybaarada an Abbott Laboratories BinaxNOW oo ay bixiso Washington State Department of Health (Waxda Caafimaadka ee Gobalka Washington) waxaana qirayaa in Xaashida Xogta ee Shaqsiyaadka ee baaritaanka la isiiyay.
2. Waxaan fahmayaa in awooda ardayga magaciisa kor lagu sheegay ee helitaanka baaritaanka ay ku kooban tahay helitaanka agabka baaritaanka.
3. Waxaan fahmayaa in shirkada samaynaysa baaritaanka aysan ahayn dhakhtarka caafimaadka ee ardayga kor magaciisa lagu sheegay. Baaritaanku badel uma noqonaayo daawaynta dhakhtarka. Waxaan qaadanayaa masuuliyada buuxda ee dhamaystiran ee qaadista talaabada ku habboon ee la xariirta natiijooyinka baaritaanka, ayna ku jiraan inaad raadsado talo caafimaad, daryeel, iyo daawayn aan ka helo dhakhtar ama wakaalad kale oo caafimaad haddii aan qabo su'aalo ama walaacyo ku aadan, haddii ardayga kor lagu xusay uu leeyahay astaamaha COVID-19, ama haddii xaalada ardayga kor lagu sheegay magaciisa ay kasii darto.
4. Waxaan fahmayaa in, si lamid ah baaritaan kasta oo caafimaad, inay jiri karto suurtagalnimada natiijada beenta ah ee cudurka la iiga waayay ama la iiga helay COVID-19.
5. Waxaan fahmayaa inay tahay masuuliyad i saaran inaan u sheego adeeg bixiyaha daryeelka caafimaadka ee ardayga kor lagu sheegay natiijada baaritaanka cudurka lagu helay, uusana jiri doonin nuqul loo dirayo dhakhtarka ardayga kor lagu sheegay ayadoo wakiil la iiga yahay.
6. Waxaan fahmayaa in natiijada baaritaanka antijiintka la heli doono 15-30 daqiiqo gudahood.
7. Waxaan fahmayaa aana qirayaa in baaritaanka antijiinta ee laga helay uu muujinaayo in ardayga kor lagu xusay u baahan yahay inuu keliyeelid galo si looga fogaado qaaddiinta dadka kale.
8. Waxaa la ii sheegay ujeedada baaritaanka, habraacyada, iyo khataraha iyo faa'iidooyinka ka ratibmi kara. Waxaan helo doonaa fursad aan su'aalo ku waydiiyo kahor sii wadista baaritaanka COVID-19. Waxaan fahmayaa in haddii aanan doonayn in ardayga kor lagu xusay uu sii wato baaritaanka COVID-19, aan diidi karo baaritaanka.
9. Waxaan fahmayaa in si loo xaqiijiyo caafimaadka dadwaynaha iyo badqabka iyo xakamaynta faafitaanka COVID-19, in baaritaanka cid kale lala wadaagi karo anoon oggolaansho shaqsi ah bixin.
10. Waxaan fahmayaa in natiijooyinka baaritaanka loo sheegi doono maamullada caafimaadka ee ay qusayso sida uu sharcigu dhigaayo.
11. Waxaan fahmayaa inaan ka laaban karo oggolaanshiyahayga baaritaanka markaan doono kahor intaan la samayn.

OGOLAANSHAHA/AQBALAADA BAARITAANKA COVID-19

- Waxaan oggolaanayaa inaan u fasaxo ardayga kor lagu xusay inuu maro baaritaanka COVID-19.

Saxiixa Waalidka/Masuulka

Taariikhda

- Waxaan aqbalayaa inaan maro baaritaanka COVID-19.

Saxiixa Ardayga (18 sano ama ka wayn)

Taariikhda